Lammaanenimo (partnership) Waalidiintu Ku-jiraan

Siyaasad Ku-howlanaan Waalid oo Dugsiyada Ontario Loogu-talagalay

Waalidiintu waa lammaane muhiim ah dhinaca waxbarashada. Waxay saameyn ku leeyihiin caruurtoodu sida ay u arkaan waxbarashada, gacanna way ka geystaan wax ku barashada guriga. Waa xarig muhiim ah oo isku xiraya dugsiga iyo guriga. Marka ay ku howlanaadaan nolosha dugsiga, waxay ka dhigaan dugsiyadeenna meelo wax lagu barto, lagu koro oo lagu faa'iido oo fiicnaan badan. Siyaasadda Ontaariyo ee ku-howlanaanta waalidka waxay aqoonsan tahay in horumarka iyo guusha ardaygu kororto, marka waalidiinta la soo dhoweeyo oo la ixtiraamo lammaane ahaan, lana siiyo taageerada ay u baahan yihiin in ay gacan kaga geeystaan guriga iyo dugsiga.

Siyaasaddan siday u qeexeysaa ku-howlanaanta waalidka?

Siyaasadda Ku-howlanaanta waalidka Ontaariyo waxay aqoonsan tahay qaabab kala duwan oo ku-howlanaan waalid, mid walbana waa taageero muhiim u ah guusha ardayga iyo dugsiga. Siyaasadda dhexdeeda, ku-howlanaanta waalidka waxaa ka jira:

- Bixinta deegaan waxbarasho oo fiican guriga dhexdiisa, si firfircoon ula shaqeynta caruurta si looga taageero waxa ay ku baranayaan dugsiga, iyo ka dhigidda waxbarashada qayb muhiim ah oo hawlmaalmeedka ka mid ah
- la yeelashada sheekooyin waxtar leh macallimiinta si ay u jirto isgaarsiin fasiix ah oo u dhaxeasa dugsiga iyo guriga
- Ku-howlanaanta howlaha dugsiga iyo iskaa-wax-u-qabsada si gacan looga geysto dhacdooyinka, safarada iyo howlaha kale ee dugsiga
- Ka-qeybgelidda Golayaasha dugsiga ee heer dugsi iyo Guddiyada Ku-howlanaanta Waalidiinta (Parent Involvement Committees) ee heer guddoon dugsi, si ay aragti uga bixiyaan.

ARAGTI

Habka Waxbarashada Ontaariyo, lammaanayaasha oo dhan waxay qirsan yihiin saameynta wanaagsan ee ku-howlanaanta waalidku ay ku leedahay horumarka ardayga. Ardayda waa la taageeraa waana la dhiirigeliyaa si ay wax ugu bartaan meel laga filayo heer sare, oo waalidiinta::

- aay u soo dhoweeyaan, ixtiraamaan una qiimeeyaan beesha dugsiga lammaane waxbarashada iyo koritaanka caruurtooda ahaan;
- aay helaan fursado ay ku howlanaadaan, iyo sidoo kale doorashooyin balaaran oo ku saabsan sida ay ugu howlanaanayaan, beesha waxbarasho si ay u taageeraan guusha ardayga;
- lagu howlgeliyo iyadoo loo marayo isgaarsiin joogto ah iyo wadahadal aay la yeeshaan lamaanayaasha waxbarashadeed ee kale si ay u taageeraan deegaan waxbarasho oo fiican oo guriga iyo dugsiga ah;
- lagu taageero maclumaadka iyo aaladaha lagama maarmaanka u ah in aay ka qeybgalaan nolosha dugsiga.

Somali

Sidee ayay siyaasaddani u taageereysaa una kordhinaysaa ku-howlanaanta waalidka?

Siyaasadda ku-howlanaanta waalidku waxay tilmaamaysaa afar istaraatiijiyooyin, oo fure u ah guusha oo loogu talagalay in lagu taageero waalidiinta lammaane ahaan si ay u helaan fursadda, xirfadaha iyo aaladaha si wadajir ah loogula shaqeynayo lammaanayaasha waxbarashada iyo in ay si buuxda gacan uga geystaan guusha ardayda iyo habka waxbarashada Ontaariyo.

Istaraatiijiyadda 1:
Jawiga Dugsiga – Kobci oo ha-jiro jawi dugsi oo fiican, soo dhoweynna leh oo aragtiyada waalidiinta oo dhan la dhiirigeliyo, qiimeeyo lana maqlo.

Istaraatiijiyadda 2:
Baabi'inta caqabadaha – Tilmaan oo ka qaad caqabadaha hortaagan ku-howlanaanta waalidka ee laga yaabo in ay ka celinayaan waalidiinta qaarkood in ay si buuxda uga qaybgalaan waxbarashada ilmahooda iyo muujinta kala duwanaanta ardaydeenna iyo beelaheenna.

Istaraatiijiyadda 3:
Taageerada Waalidiinta Loogu-talagalay – In la siiyo waalidiinta aqoonta, xirfadaha iyo aaladaha aay u baahan yihiin si aay gacan uga geystaan waxbarashada ardayga ee guriga iyo dugsiga.

Istaraatiijiyadda 4:
Wacyigelinta Waalidka – Dib-u-eeg oo ballaari istaraatiijiyooyinka isgaarsiinta iyo wacyigelinta sida siminaarada, bandhigyada, aaladaha iyo ilaha wax laga helo ee deegaanka si aay warka dadka ula wadaagaan iyo istaraatiijiyooyinka la xiriira taageerada waxbarashada guriga marka la joogo iyo ku-howlanaanta waalidka ee dugsiga.

Sidee lagu gaari doonaa hadafyada siyaasaddan?

Siyaasaddani waxay tilmaamaysaa falal gaar ah oo ay tahay in heer gobol, deegaan iyo degmo ay ka sameeyaan Wasaaradda Waxbarashada (Ministry of Education), Dugsiyada iyo Guddoonnada Waxbarashada Degmada (District School Boards).

Sidee ayeey ardayda iyo waalidiintu uga faa'iidayaan ku-howlanaanta waalidka?

Cilmi-baarista ku-howlanaanta waalidka waxay noo sheegeysaa in uu jiro xiriir toos ah oo ka dhaxeeya ku-howlanaanta waalidka iyo:

- Horumarka aqoonta oo hagaagta
- Dareenno fiican oo dheeraad ah oo dugsiga ku saabsan
- Guulo dheeraad ah oo dhinaca shaqada-guriga
- Cadadka qalinjabinta dugsiyada sare oo kor u kaca Tagidda dugsiga oo si dheeraad ah joogto u noqota
- Dhibaatooyinka edebta oo yaraada
- Mustaqbal iftiin badan ee ardayda dugsiga iyo noloshooda dambeba.

Sidee ayeey macallimiintu uga faa'iidayaan?

Macallimiinta sida firfircoon lamaane ula noqda waalidiinta waxay helaan xiriirro wanaagsan oo ay la yeeshaan waalidiinta, iyo faa'iidooyin balaaran oo kala duwan:

- Waalidiintu waxay noqdaan kuwo si dheeraad ah u taageera sababtoo ah waxay fahamsan yihiin waxa ka dhacaya fasalka
- Waalidiintu waxay gacan ka geystaan in la hubiyo in shaqada-guriga iyo shaqooyinka loo diro ardayda la sameeyo
- Waalidiinta oo qaybtooda ka qaata mas'uuliyadda guusha ardayga lana shaqeeya macallinka
- Waalidiinta oo aragti fiican oo dheeraad ah u yeesha macallimiinta iyo dugsiga
- Tegidda dugsiga iyo edebta fasalka dhexdiisa ah oo hagaagta
- Macallimiinta oo la lahaada waalidiinta xiriir ka xoog badan kii hore, oo dareema in waalidiintu aay taageerayaan, oo ku-qanacsanaan shaqadooda kor u qaada.

Sidee ayeey dugsiyadu uga faa'iidayaan?

Dugsiyadu waxay ku xiran yihiin beelaha ku wareegsan. Si wadajir ah, waalidiinta, xubnaha beesha iyo dugsiyadu waxay abuuri karaan shabakad taageero oo awood leh oo siisa caruurta iyo dhalinyarada adeegyada ay u baahan yihiin, sameeya barnaamijyo halabuurnimo leh oo dugsiga-beesha ah, oo kobciya nolosha dugsiga. Natiijo ahaan:

- Qoysaska iyo ururada beeshu si buuxda oo dheeraad ah ayay u taageeraan dugsiga
- Horumarka dugsiga-oo-dhan iyo ardayga shaqsi ahaanba badanaa way hagaagaan
- Dugsiyadu waxay ku xirmaan ganacsiyada, hay'adaha iyo adeegyada beesha dhexdeeda ah
- Dugsiyadu waxay helaan aqoonsi dheeraad ah ee dhinaca horumarkooda iyo doorkooda oo lagu qiimeynayo qeyb muhiim ah oo ka mid ah nolosha beesha ahaan.

Habka waxbarashada siduu uga faa'iidayaa?

Wasaaradda Waxbarashada (Ministry of Education), Guddoonada Waxbarashada Degmada (District School Boards) iyo dugsiyada kama faa'iidaan oo kaliya shaqada muhiimka ah ee ay waalidiintu sameeyaan si ay u caawiyaan caruurtooda in ay dugsiga ku guuleystaan, laakiin sidoo kale in ay hubiyaan aragtiyada waalidka in la maqlo oo la tixgeliyo marka la samaynayo siyaasadaha iyo barnaamijyada heerarka gobol, degmo iyo deegaan.

Innaga oo dhan waan faa'iidnaa

Si-wadajir ah, waxaan ugu dhiseynaa caruurteenna fursado iyo annagoo fursadahan u bedelna xaqiiqo.

Si aad wax dheeraad ah u ogaato: booqo www.ontario.ca/EDUparents

© Queen's Printer for Ontario, 2010 ISBN 978-1-4435-4785-7 (Print) 978-1-4435-4786-4 (PDF)